# SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1037
# WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BUTROS
# 1:24-2:1-2

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay Warqaddii kowaad ee rasuul Butros. Waxaa warqaddu isugu jirtaa waxbaris, guubaabo iyo weliba dhiirrogelin.

Isagoo guubaabinaya masiixiyiinta ayaa waxaa rasuuul Butros leeyahay sida ku qoran isla Warqaddan kowaad 1:23, oo leh: **"Idinka mar kale laydinkuma dhalin abuur baaba'aya, laakiinse waxaa laydinku dhalay abuur aan baaba'ayn oo ah eryaga Ilaah oo nool oo waara."**

**SONG: REEL----CUT--------**

Markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay

dhegaystayaal faalladii dheerayd ee aynu idinka siinnay aayaddii 23aad ee cutbka kowaad ee Warqaddii kowaad ee rasuul Butros. Weli faalladii aayadda ayaannu ku jirraaye, laydinkuma badbaadin karo wax kale, ama wax kale kama dhalan kartaan Haddaanay ahayn Hadallada Ilaah. Kitaabka Qoduuska ahina waa mid cajaa'ibyo badan.

Inkastoo aan rumaysanahay, weli waan la fajacaa inaan maqlo ama helo waraaqo badan oo ka kala yimaada dhegyastayaal fara badan. Waxay ii sheegaan inay ku beddelmeen wacdiska Iniilka nimcada ee lagu wacdiyey. Haddaba wararkaasu waa kuwo cajiib ah, laakiin welibana garan maayo sida nafsaddooda loo beddelay. Waxaan garanayaa hal sheey, waxaana weeye Hadallada Ilaah, oo nool oo waara inay leeyihiin awood ay ku beddelaan nafsadda aadmiga.

Waxaannu maanta nool nahay wakhti dadkii oodhan ay is-beddeleen, oo raggu waxay raadiyaan macaasi, habluhuna waxay soo xidhaan waxyaabo ku dheggan oo muujinaya jidhkooda si raggu u jeclaado ama u caashaqo xitaa haddii ay hablo kale qabaan. Habase yeeshee tan dadka anfaca u leh maanta oo ay kaga gudbi karaan nolosha xun ee dhibaatada iyo welwelka miiran ah, waxaa weeye inay u yimaadaan Badbaadiyahooda, oo ay isaga ku kalsoonaadaan, waxaana u bilaabanaya oo la siinayaa dhalashada labaad.

Waxaa dunida ka jira dhalasho mucjiso lehwaayo Hadallada Ilaah waa kuwo hagaagsan oo welibana toolmoon, waxaanay ka dhex dusayaan jidhka oo garayaan qalbiga, waxaanay kaa dhigayaan isla markaasba mid ka mid ah muuminiinta Ilaah. Haddaba

saaxiibow, maxay tanu ahmiyad ballaara tahay! Dadkiise waxay u jeesteen sino, oo waxay seegeen wixii anfaca u lahaa, oo ah Hadallada Nool ee ah erayga Ilaah oo Waara.

Waxay ka daba ruclaynayaan ama ka daba-ordayaan waxyaabo aan munaasab ahayn oo maran. Mararka qaarkood waxay ila noqotaa in aadmiga oo dhan ay isku dhiibeen macaasi! Waxa dhalshada labaad ay ku heli karaan ama soo noolayn kara waxaa weeye oo kleiya Hadallaa Ilaah, kuwaasoo innaga inoo muujiya Masiixa.

Wax kale ayaa haddaba dhacaya, oo innaga dhexdeenna soo gelaya, waxaana weeye in innagu aynu mar kale dhalannay. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka ayaannu dhegaystayaal imminka idiin akhriyeynaa 1:24, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Waayo, Wax kasta oo jidh lahu waa sida caws oo kale, oo Quruxdiisa oo dhammuna waa sida ubax duurka oo kale, Haddaba cawsku wuu engegaa, ubaxuna wuu dhacaa."**

Haddaba marnaba yaanay kula noqon inay jiri karaan sheey aynu Ilaah siin karno oo qimi leh oo innaga laga dhex helayo. Wax kasta ee qofku sarraysiiyo waa sida ubaxa berrinka. Marka dhinaca kale laga eego waxaa la leeyahay, dadku waa sida cawska oo kale, oo iska baaba'a. Dusha markii aad ka egto waa wax bilicsan, oo qurxoon, laakiin xilliga jiidaalka ama diraacda, waa sida wax dhintay oo kale oo iska baaba'.

Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska oo soo gunaanadno cutubkii kowaad oo aynu aad iyo aad ugu

dheeraannay, ayaannu isla eegaynaa baalka 405 ee Warqaddan kowaad ee rasuul Butros 1:25, waxaana qorniinka Qoduuska ahi leeyahay sidatan:

**"Laakiinse erayga Rabbigu weligiisba wuu waaraa. Haddaba kaasu waa eraygii warka wanaagsanaa oo laydinku wacdiyey."**

Saaxiib, waxaannu innaga ood han u baahan nahay in laynagu wacdiyo oo wax laynaga baro Hadallada Ilaah ee wax waliba ka sarreeya. Waxay ka sarreeyaan wax waliba ee dadku isku mashquuliyo sida miyuusikada, ururrada la dhiso, xeerarka iyo hannaanka dawladnimo ama sharciyada. Wax kastaba waxaa ka sii sarreeya Hadallada Ilaah, oo wuxuu rasuul Butros inagu leeyahay aayaddiisan ugu dambaysa ee cutubka kowaad sidatan:

**"Laakiinse erayga Rabbigu weligiisba wuu waaraa. Haddaba kaasu waa eraygii warka wanaagsanaa oo laydinku wacdiyey."**

Miyaanu kaasu ahayn dhegayste dardaaran wax ku ool ah? Waa dardaaran wax ku ool ah bil-xaqiiqa oo haddii aan idiin yara dul maro cutubkii kowaad ayaa waxaa aniga aad ii taabtay aayaddii 13aad iyo weliba tii 23aad. Bal aan ku hormaro aayadda 13aad ee isla cutubkan kowaad, markaasoo rasuulku uu lahaa, isagoo dhiirrogelinaya masiixyiintii wakhtigiisa:

**"Haddaba isku giijiya guntiga maankiinna, dhug yeesha, oo aad u rajeeya nimcada laydiin keeni doono markii Ciise Masiix la muujiyo."**

Waa dardaaran lala dardaarmayo Masiixyiinta oo loo sheegayo inay xagga garaadka iyo maskaxda ka digtoonaadaan, ama ka dhiif-oonaadaan. Waxaa kaloo haddana rasuulku leeyahay sida ku qoran aayadda

23aad ee isla cutubkan kowaad, markaasoo uu lahaa, iyadoo uu rajada masiixiyiinta ifinayo, sidatan: **"Idinka mar kale laydinkuma dhalin abuur baaba'aya, laakiinse waxaa laydinku dhalay abuur aan baaba'ayn oo ah eryaga Ilaah oo nool oo waara."** Gagagabadiina waxay noqotay, oo rasuulku leeyahay sidatan ku qoran aayadda 25aad, oo waxaa qoran: **"Laakiine erayga Rabbigu weligiisba wuu waaraa. Haddaba kaasu waa eraygii warka Wanaagsan oo laydinku wacdiyey."** Miyaanu saaxiib kaasu inoo ahayn war wanaagsan?

**MUSIC.**

Waxaa intaas inoogu soo dhammaanaya dhegaystayaal meeriska cutubkii labaad, waxaanan imminka si dawaali ah idiinku bilaabaynaa:

**CUTUBKA LABAAD EE WARQADDII**
**KOWAAD EE RASUUL BUTROS.**

Waxaa cutubkan labaad lagu adkaynayaa dhegaystayaal silica wadaaddada ama muuminiinta iyo weliba silica Masiixa. Haddaba cutubkayada 2,3, iyo 4 wuxuu rasuul Butros uga hadlayaa sida caruurta Ilaah u dhibtoodaan iyo weliba silicii Sayid Ciise Masiix. Saddexdaas cutub waxaannu ku arkaynaa sida silicu ugu dhammaystirmayo nolosha masiixyiinta. Waxaanan ogaan doonnaa in Silicu keeno kala dhaqaaqid, Waxaana qofka masiixiga ah uu ka gudbayaa ama ka tallaabsanayaa damacyadii jidhka, sida ku qoran cutubka 2aad.

Iyo in silicu keeno dhaqan masiixinnimo, sida ku qoran cutubka 3aad. Waxaan kaloo arkaynaa in silicu keeno in doonista Rabbiga loo hoggaansamo sida ku qoran cutubka 4aad. Waxaanse ugu horumarinaynaa maaddada khusaysa:

## SILICA KEENAYA KALA DHAQAAQIDDA.

Marka aynu ka hadlayno kala dhaqaaqista, ama in Rabbiga loo noolaado, ayaa waxaa soo baxaya halista ah in laysku keeno laba aragti oo kala durugsan, kuwaasoo anigu aan u qaatay inay ka baxsan yihiin qorniinka. Haddaba labadaas aragti mid ka mid ah ayaa waxay tahay inay jiraan kuwo ay la tahay in dabiicadda aadmigu ay u baahan tahay un jahayn cusub, iyo in la loo yeelo ujeeddo suubban iyo toobadkeen ama hanuun.

Kooxdaas aaminsan ama haysta aragtidaas waxay aaminsan yihiin inaan dabiicadda aadmigu waxba ka xumayn, balse ay u baahan tahay oo keliya in la wacyi geliyo qofka oo la kiciyo tamartiisa iyo xigmaddiisa ama garaadkiisa iyo damiirkiisa si uu ugu noolaado Saidka. Waa hal aragti oo nimanka cilmiga leh ee kiniisaddu ay aaminsan yihhin waxaanay aaminsan yihiin inay keenayso in qofku u noolaado Ciise Masiix.

Aragti kale oo iyana dadka qaarkii aaminsan yihin ayaa waxa leedahay marka qorku dhasho wuxuu la dhashaa hoodo iyo nasiib, ha yeeshee waxyaabahaasu ma shaqeeyaan ilaa qofku dhanka Ilaah ka soo aado, oo Ilaah ka taabbagelinayo ama uu ka hirgalinayo danta khaaska ah ee shakhsigaas isaga ah uu ka leeyahay. Kooxda aragtidan aaminsan waa kwo aragtidooda ku adadag.

Waana kuwo wax aanay ahayn is-mooday. Wxaanay u muuqataa inaanay ugu korin jacaylka Ilaah sidii la doonayey si ay ku noqdaan qof masiixi ah oo caadi ah ama la mid ah dadka kale. Waxaa haddaba cutubkan

labaad uu inoo caddaynayaa in aniga iyo adiga, oo lagu dhalay abuur aan baaba'ayn oo ah erayga Ilaah oo nool oo waara, aynu leennahay dabiicad cusub.
Waxaana la doonayaa in dabiicaddaas cusub aynu ugu noolaanno awoodda Ruuxa Qoduuska ah. Waxaannu xiriir kalgacaltooyo la leennahay kan iyadoo aynaan arag, haddana aynu jecel nahay. Simon Butroros wuu arkay, oo wuuna jeclaaday, oo inkstoo aniga iyo adiguba aynaan arag isaga, Ruuxa Qoduuska ah ayaa nafsaddeenna hubaal uga dhigaya siaynu isla sidii Butros ugu jeclaada oo kale aynu innanan u jeclaanno.
Saaxiib markii qofku mar labaad dhasho, wuxuu noqonayaa sida mid aad iyo aad ugu reyrreeya dhalashadiisa labaad. Waxaa rasuul Bawlos wax inooga bidhaaminaya sida ay tahay marka ugu horraysa ee qofku Masiixa soo raaco, wuxuuna leeyahay sidatan ku qoran Warqaddiisii labaad ee reer Korintos 11:2, waxaana qoran sidatan:
**"Waxaan idinku masayrsanahay masayr xagga Ilaah ah, waayo, waxaan idiin guuriyey nin keliya, inaan idiin dhiibo Masiix idinkoo ah bikrad daahir ah."**
Haddaba kuwii masiixyiinta ahaa ee reer Korintos waxay noqdeen kuwo isku dhiibay jidhka. Waxaa soo dhammaaday jacaylkoodii hore ee Masiixa. Waxaa reer binu Israa'iil qudhoodu ay la kulmeen khibrad la mid ah tii masiixyiintii reer Korintos. Markii hore waxay aad u jeclaayeen Ilaah, oo waxay noqdeen kuwo aragti ahaan seef la bood ah.
Laakiin kolkii dambe way soo dhammaatay jacaylkii ay u qabeen Ilaah. Nebi Yeremyaah ayaa wuxuu qaranka uga digayaa jacaylkooda Ilaah oo sii nuxuusaya,

wuxuuna leeyahay sida ku qoran kitaabkii Yeremyaah 2:2, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Tag oo Yeruusaalem dhegaha kaga qayli, oo waxaad ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxaan xusuusanahay roonaantii yaraantaada iyo jacaylkii doonanaantaada, markaad igu raaci jirtay cidlada ahayd dal aan waxba lagu beerin."**

Reer binu Israa'iil waxay muujiyeen jacayl ay Ilaah u qabaan markii ay Masar ka soo bexeen oo ay cidlada yimaadeen, oo ay ka soo gudbeen ama mareen Badda Cas. Waxay heeseen hees ay Ilaah ku ammaanayaan, oo waxay yiraahdeen sida ku qoran kitaabkii Baxniintii 15:1, oo leh:

**"Markaasaa Muuse iyo reer binu Israa'iil waxay Rabbiga ugu gabyeen gabaygan, oo intay qaadeen, bay yidhaahdeen, Anigu Rabbiga waan u gabyi doonaa, waayo, ammaan buu ku guulaystay; Faraskii iyo kii fuushanaaba wuxuu ku tuuray badda."**

Habase yeeshee wakhti sidaas u dheer kama soo wareegin markii ay bilaabeen inay Ilaah ku gunuusaan. Saaxiib, maanta kala dhaqaaqidda dhabta ah ee Ilaah iyo dadka waxay qabsan kartaa adiga oo ah nin Masiixa ah oo welibana le dabiicad masiixinnimo oo cusub, oo weliba imminka jecle Masiixa Jacaylka aad jeceshay ayaa adiga kaa dhigaya inaad isaga raalligarayso.

Tan Ilaah ku hawlan yahay ee ahmiyadda leh waxaa weeye inuu nafo badbaadiyo. Maahan oo keliya inuu ka badbaadinayo ciqaab iyo cadaab, laakiin wuxuu ka badbaadinayaa dunida. Haddi qofku jeclaysto waxyaabaha dunida lagu kari maayo inuu jeclaysto waxyaalaha Samada. Waayo Sayid Ciise Masiix

qudhiisaa leh, ninna laba Sayid uma wada shaqayn karo, mid buu u adeegayaa, oo kan kalena wuu quursanayaa. Ilaah wuxuu doonayaa in dadku badbaado, waxaanay ka imanaysaa badbaadaduqalbiga Masiixa oo isagu doonayey inuu dadka dembiyadooda isku bixiyo.

Markaa hawshii Masiixu ku sameeyey iskutallaabta ayaa waay dejisay suaal waliba ee dembigug keenay ee dhextiillay Ilaah iyo nafsaddeenna. Mustaqbalka wuxuu la ifayaa ammaatna Ilaah, waxaana imminka layna soo istaajiyey ama soo gaarnay qiimaha ay leedahay furashada, waa kuweenna masiixyiinta ah e. Mar kale ayaannu dhalannay.

Wax cabsi ah lagama qabo in cidi is-hortaagto qorshaha nabaadiinada, oo xitaa shayddaanka ayaan is-hor-taagi karin. Su'aasha imminka taaganina waxay tahay, saaxiib, sidee baannu uga soo dhalaalaynaa nolosha masiixinnimada inta aynu dunida joogno? Waa sidee xiriirka aynu dadka la leennahay iyo kan aynu Masiixa la leennahay? Waxaan filayaa inaad jawaabta kala soo dhex bixi doontaan meeriska cutubkan labaad oo aynu caaway idiin bilaabi doonno, waxaanad la soo kala baxaysaan baalka 405 ee Axdiga Cusub, Warqaddii kowaad ee rasuul Butros 2:1-2, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Haddaba, sidaas daraaddeed iska wada fogeeya xumaan oo dhan, iyo khiyaano oo dhan, iyo laba wejiilenimo, iyo xaasidnimo, iyo cay oo dhan, oo sida carruur dhallaan ah u jeclaada caanaha Ruuxa ee saafiag ah, si aad ugu kortaan xagga badbaadada."**

Sida aad imminka arkayso, Ilaah wax waliba inoo

samayn maayo; waxaana jira wayxaalaha qaar ee ay tahay inaynu innagu samaysanno. Marka hore, waxaa jira waxyaabo aynu ka tanaasulayno. Bawlos, ayaa wuxuu inoogu sheegayaa warqaddiisii uu u qoray masiixyiintii reer Efesos, ayaa wuxuu la barbardhigayaa dabiicaddii hore ee dembiga lahayd, oo ah waxa geeska layska marinayo, sida nin dharkii uu xirnaa iska siibaya.

Waxaana uu leeyahay isda ku qoran Warqaddiisii reer Efesos 4:22-25, baalka 341 ee Axdiga Cusub, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Waa inaad iska xoortaan dabiicaddii hore, oo ku saabsanayd socodkiinnii aad ku socon jirteen, taas oo kharribanta xagga damacyada khiyaanada; oo waa inaad ku cusboonaa-taan ruuxa maakiinna."**

Haddaba aayadda 25aad ee isla Warqaddan reer Efesos ayaa waxaa rasuul Bawlos mar kale ku leeyahay;

**"Sidaas daraaddeed beenta iska fogeeya, oo midkiin waluba deriskiisa run ha kula hadlo, waayo, innaga midkeenba midka kale wuxuu u yahay xubnihiisa."**

Bawlos oo u sharraxaya reer Korintos ahmiyadda ay leedahay in dabiicadihii hore laga tago ayaa wuxuu leeyahay sida ku qoran Warqddii kowaad ee reer korintos 5:7-8, baalka 296 ee Axdiga Cusub, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Khamiirkii hore iska safeeya inaad noqotaan cajiin cusub sidii idinkoo aan khamiirsanayn. Waayo, Masiixa ah Kormariddeenna waa la sadqeeyey. Haddaba yaynaan ku iidin khamiirkii hore ama khamiirka xumaanta iyo sharka, laakiin aan ku iidno kibista khamiirka la' ee daacadda iyo runta ah."**

Weli waxaannu ka hadlaynaa sida loogu baahan yahay

in qofku muujiyo isbeddel xagga gudaha ah oo muuqda. Reer Binu Israa'iil markii ay xusayaan Ciidda Kormaridda iyo Ciidda kibista aan khamiirka lahayn, ayaanay cuni jirin kibis la khamiiriyey, Waxaanay taasu astaan u tahay in qofku uusan ku noolaan noloshii hore ee uu horey ugu noolaa. Waxaana qofku iminka uu cunayaa waxyaabo ka duwan wixii uu horey u cuni jiray, waxaanay waxyaabahaas oo dhan tilmaamayaan in is-beddel ku yimid qofka, wuxuuna helayaa kororsiimo.

Isla sidoo kale rasuul Bawlos wuxuu ku leeyahay masiixyiintii reer Koritntos, markii ay u yimaadaan Masiixa, waa inay ka tagaan khamiirkii hore, oo uu ula jeedo shrnimada iyo dullinnimada. Sida muuqata, innagu marnaba kaamil ku noqon mayno nolosha, waayo noloshii hore ama dabiicaddii hore inta aynaan Masiixa noqon ka hor aynu lahayn, mar waliba way soo noqnoqonaysaa ama ka dhex muuqanaysaa qofka.

Wuxuu rasuul Butrosna leeyahay haatan,

**"...haddaba sidaas daraaddeed iska wada fogeeya xumaan oo dhan."**

Maxaa loola jeedaa iska fogeeya xumaan oo dhan? Waxaan u malaynayaa inay ay khusayso cadhada aan la illaawin iyo qofka aan lahayn samirka uu ku cafinayo kuwa isaga waxyeela. Haddaba saaxiib miyaa caro ay ku badatay niyaddaada, oo aad harqood ama culaab weyn ku wadataa garbahaaga? Haddii taasu jirto, inkastoo aad Masiixi tahay, haddana kuwa ku hareer jooga garan kari maayaan ama arki maayaan wax isbeddel masiixinnimo ah oo adiga kaa muuqda. Markii rasuulku yiri, iska fogeeya xumaan oo dhan, ayuu wuxuu raaciyey, iyo khiyaano oo dhan. Khiyaanadu waa

xariifnimo aad qof kaga aarsanayso ama inaad qof iska gadayso, ama aad doonayso inuu si kale kuu arko. Ananiyas iyo Safiira waxay isticmaaleen khiyaano markii ay isku dayeen inay lacagta ay guriga ku soo iibiyeen barna la haraan, barna jameecada u keenaan, iyagoo ka dhigaya sida inay wada keeneen wixii guriga ay ku soo iibiyeen oo dhan. Waa khiyaamo qarsoon oo dadka laysugu muujinayo sida qof wacan oo wanaagsan.

Marka runtuna ay tahay inaanu wanaag iyo wacnaan jirin, laakiin qofkii laga diyaarsanayo simpaatiyo ama in magac iyo maamuus lagu raadsado khiyaanadaas. Waxyaabahaas oo dhan waxaa laga helaa dabiicaddii hore ee qofka markaasoo qofku uu jeclaysanayo oo keliya inuu wax waliba ku sameeyo dan soo gashay, laakiin aanu u samaynaynin ficilo kheyr dadka uu ugu axsaan falayo. Dabiicaddii hore ee qofka Masiixiga ah waxaa ku badan ama ay u janjeertaa inay dadka kale xumaan ku samayso.

Haddaba waxyaabo badan ayaannu gees iska dhigaynaa sida rasuulku uu ku talinayo oo wuxuu leeyahay haddaan aayadaha kowaad iyo tan labaad ee cutubka labaad, haddaan ku noqonno, sidatan:

**"...iyo laba-wejiilenimo, iyo xaasidnimo, iyo cay oo dhan oo sida carruur dhallaan ah u jeclaada caanaha ruuxa ee saafiga ah."**

Haddaba caanuhu waa caanaha Ruuxa. Isla sida dhallaanka caadiga ah ugu gaajoodo caanaha, ayaa qofka Masiixiga ahina ugu gaajoodaa Hadallada Ilaah. Waxaan haddaba xusuustaa markii dhallaankayga qaarkii caanuhu ka daahaan inuu aad u ooyi jiray. Markii caanaha la soo hordhigo, aa iyo

aad buu u farxayaa, oo maba sugi kro inta afka looga gelinayo dhalada.
Waxaa loo baahan yahay in innaguna aynu u harraadno Hadallada Ilaah, waayo waa kuwa kaleiya ee keeni kara inaynu nimcada iyo aqoonta Masiixa ku korno maanta. Habeenka xiga ayaannu dhegaystayaal horey idiinku sii wadaynaa meeriska haatnase aynu wada dhegaysanno qasiiddaddan:

**SONG: REEL---CUT-----**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.
Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin